

Barnaamijka Gargaarka Shaqo-la'aanta Saf-mareenka (PUA) ayaa billaabmay Mey 1.

PUA waa barnaamij cusub oo federaal ah oo cayminaya iskood-u-shaqeysatada iyo qaar kaloo badan oo aan sida caadiga ah u qalmin dheefta shaqo la'aanta caadiga ah, oo ay ka mid yihiin: beeraleyda, kalluumeysatada, qandaraasleyaasha madaxa-bannaan, shaqaale daruuriga showyada dhiga, shaqaalaha shirkadda bilaa macaashka ah ee aan horay u caymisnayn, shaqaalaha aan lahayn taariikh shaqo ama kasbasha ku filan inay uqalmaan gargaarka shaqo la'aanta caadiga ah iyo qaarka kale ee loo go'aamiyay inayna uqalmin dheefaha shaqo la'aanta caadiga ah. Wuxuu dhacayaa Disambar 31, 2020.

Su'aalaha Badanaa La Weyddiyo

HABRAACA GARGAARKA SHAQO-LA'AANTA SAF-MAREENKA (PUA)

1. Ma jiraa arji kale oo ka gaar ah PUA?

Maya. Qof kastaa wuxuu isticmaalaa isla codsiga ReEmployME oo isku mid ah. Codsiga waxa loo beddelay inuu bixiyo su'aalo kala duwan oo ku saleysan jawaabaha, sida kuwa iskood-u-shaqeysta.

2. Maxaa dhacaya haddii aan horeba u leeyahay koonto ReEmployME loo-shaqeeye?

Waxaad u baahan inaad sameysato koonto cusub oo "sheegte" ah, oo laga heli karo dhinaca midigta ee shaashadda soo-gelidda (log-in) ReEmployME. Uma baahnid Tirada Koontada Loo-Shaqeeyaha (EAN) si aad u samaysato koonto sheegte ama aad u xerayso sheegasho.

3. Sideen ugu xeraystaa dheefaha shaqo-la'aanta hoos timaadda barnaamijkan cusub?

- A. Haddii aad mar hore codsatay dheefaha oo lagu diiday dakhli ku filnaansho darteed, {ut1}mar kale HA codsan{ut2}. Sheegashadaada ayaa ku jirta nidaamka oo si otomaatig ah ugu wareegi doonta PUA. Ku sii wado xeraynta uqalmiddaada toddobaadlaha ah.
- B. Haddii aad iskaa-u-shaqeysato, oo aad xeraysay sheegasho kahor inta aysan diyaar noqon helidda PUA oo lagu diiday; adigu, uma baahnid inaad dib u xerayso sheegasho PUA ee hore, waa lagu qori doonaa PUA laakiin ma xerayn doontid sheegashooyinka toddobaadle ah ee PUA. Haddii ay kuu maqan yihiin sheegashooyin toddobaadle oo ah inaad xerayso, kuwaa waxa lagu sheegi doonaa go'aaminta lacageed ee PUA oo waxa lagugula talin doonaa inaad xerayso sheegashooyinkaas. Nidaamku wuxuu kuu oggolaanayaa inaad xerayso toddobaadyada la qoray.
- C. Haddii aad iskaa-u-shaqeysato oo aadan wali xerayn sheegasho, booqo www.maine.gov/unemployment oo u buuxi foomka codsiga la habeeyay ee loogu talagalay PUA. U gudbi uqalmiddaada toddobaadlaha ah toddobaad kasta wixii intaa ka dambeeya.
- D. Haddii aadan {ut1}AHAYN{ut2} iskaa-u-shaqeyste oo aadan weli xerayn sheegasho hore oo hoos timaad midkoodna barnaamij shaqo-la'aan, waxaad u baahan tahay inaad xerayso garaysato sheegashada shaqo-la'aanta caadiga ah marka hore si loo go'aamiyo inaad uqalanto. Haddii la go'aamiyo inaad uqalmin, sheegashadaada ayaa si otomaatig ah loogu beddeli doonaa sheegasho PUA. Booqo www.maine.gov/unemployment oo buuxi codsiga brnaamijka shaqo-la'aanta gobolka ee caadiga ah.

4. Sidee ugu dhakhsaha badan ee aan u heli doona bixinta dheefta?

Haddii sheegashadaada PUA aysan uga baahnayn dibu-eegis dheeraad ah barnaamijka shaqo-la'aanta, waa inay kuu bilaabanto helitaanka dheefaha toddoba maalmood ama wax ka yar gudahooda laga soo bilaabo xerayntaadii ugu horreysay.

5. Immisa ayaan heli doonaa?

Dheefaha PUA ayaa ku bilaabma 50% celcelis ahaan dheefaha shaqo-la'aanta gobolka loogu talagalay iskaa-u-shaqaysadka iyo kuwa aan qancin uqalmidda lacageed ee barnaamijka shaqo-la'aanta caadiga ah. Taasi waa \$ 172/todobaadkii. Haddii aad iskaa-u-shaqeysato, markaan xaqiijinno kasbashooyinka diiwaangashan, dheefaha PUA ayaa loo dheellitiri doonaa, gadaal uga soo eeg. Dheefaha ugu badan ee lagu heli karo hoosta PUA waa \$ 445/todobaadkbaii.

Intaa waxa u dheer, qof kasta oo qaata dheefaha PUA ayaa walibana ka heli doona \$600 oo dheeri toddobaadle ah barnaamijka Magdhawga Shaqo-la'aanta Saf-mareenka (FPUC) oo diyaar u noqon doona sheegashooyinka la xeraeyo illaa usbuuca dhammaanaya Julaay 25, 2020.

WAXAAD FILAN KARTO

6. Maxay koontadaydu u leedahay “waa mushqaayado aan ku filnayn?” Waa maxay sababta aan uu helay warqadda boosta iigu timid ee leh lacagta dheefahaagu waa “0”?

Haddii aad codsatay PUA oo ah laga soo bilaabo markuu barnaamijku billaabmay Mey 1, koontadaada ayaa oran karta “waa mushqaayado aan ku filnayn?” iyo/ama waxa dhici karta inaad heshay warqad sheegaysa inaad haysato lacag dheefo “0” ah. Weedhahan macnahooda MA AHA in lagu diiday dheefaha PUA! Farriinta iyo warqadda ayaa tilmaamaya inuu nidaamka shaqo-la'aantu hubinayo ee lagu hubinayo inaad uqalmin dheefaha shaqo-la'aanta caadiga ah ee gobolka isla markay u gudbinayso sheegashadaada PUA. (Waxda ayay dawladda federaalku uga baahan tahay inay hubiso inaysan xereyeyaashu uqalmin shaqo la'aanta gobolka kahor intaan la siin lacagta dheefta PUA. Warqadda laguugu soo diro boostada ayaa qayb ka mid ah nidaamka waajibka ah.) fadlan fiiri koontadaada gudaheeda 24-48; ogaysiintu waa ka tirtiranataa, oo sheegashadaada waa inay si buuxda xallin uga heeshaa PUA. Sababo la xiriira taraafikada goobtan internet oo sarreysa daraadded, fiidkii ayaa ah waqtiga ugu wanaagsan ee koontadaada aad dhex gasho. Gudahooda Toddoba maalmood marka la codsado, dheefta PUA ayaa la go'aamin doonaa oo toddobaad kasta oo uqalma ayaa isla markaaba lacagtooda loo bixin doonaa. Wixii markaas ka dambeeya, fadlan ku sii wad xereynta sheegashooyinka uqalmidda.

7. Haddii aan iskiis-u-shaqayste ahay, sidee ayaan uga jawaabaa su'aasha #4?

Haddii aad iskaa-u-shaqeysato oo aadan wax mushqaayad ah ku lahayn loo-shaqeeye sannadkii kalandarka 2019 ama 2020, waa inaad xulataa “NO” (MAYA) Su'aasha 4. Ha ka xulan gobol Su'aasha 5. Si aad uga noqon karto xulasha gobol, guji laba jeer xulashadaada si aad uga saarto.

8. Haddii aan iskay u shaqaysto oo aan xeraynayo sheegashooyinka toddobaadlaha ah ee hoos yimaad PUA, sidee ayaan u soo sheegaa dakhliyada aan kasbaday?

Sheegashadaada toddobaadlaha ee PUA, waa inaad ku soo sheegtaa wixii kasbasha ah ee qaybta "odd jobs." (shaqooyin kuu gaar ah) Dakhligaas waa in lagu sheegaa dakhligooda guud. Waa inaad kaydisaa caddaymaha kharashyadan.

9. Muxuu wakhtigayga isticmaalku iiga dhammaaday markaan buuxinayay sheegashadayda?

Ujeeddooyin amni awgood, nidaamka ayaa kaa xiri doonta goobta 10 daqiiqo waxqabad-la'aan kaddib. Qiyaastii 2 daqiiqo kahor intuuna wakhtiga isticmaalku dhammaanin, sanduuq ayaa soo bixi doona digniin wata, kaas oo ku siinaya ikhtiyaarka inaad ku dooran karto "sii wad hawsha." Haddii u wakhtiga isticmaalku dhammaado, wixii xog ah ee horay loo keydiyay ayaa laguugu hayn doonaa markaad dib u soo gasho goobta.

10. Koontadayda ayaa dhahaysa waxaa kala joogsaday xerayntii. Maxaan sameeyaa?

Haddii aad leedahay saddex ama in ka badan oo uqalmid toddobaadle ah oo aan la xeraynin, awooddaada aad u leedahay inaad xereyso ayaa xayirmaysa. Sababtaas awgeed, waa inaad xereysaa uqalmitaankaaga toddobaad kasta, oo aad ka soo warbixisaa wixii kasta ee mushqaayada eee aad kasbatay toddobaadkii hore. Si loo hubiyo in qof walbaa u la qabsado, waaxda ayaa toddobaadyo dheeraad ah u diyaarin doonta xeraynta. Si joogto ah u eeg koontadaada si markay kuu jirto aad u xerayn karto toddobaadyada kaa maqnaa.

CAYNSANAATA

11. Miyey shaqaalaha showyada dhiga, kuwa iskood u shaqeysta iyo qandaraasleyaasha madaxbannaan ku caynsan yihiin?

Haa. Dadka iskood-u-shaqeysta ayaa uqalma dheefaha shaqo-la'aanta hoos timaad PUA.

12. Maxaa dhacaya haddii aan qabo cudurka COVID-19 ama aan u baahdo inaan daryeelo xubin qoyska ka mid ah oo qaba cudurkaas?

Haddii lagaa helay cudurka COVID-19, aad leedahay astaamaha ama aad raadineyso in lagaa baaro — oo aad tahay shaqo-la'aan, qayb ahaan shaqo-la'aan ama aadan shaqayn karin sidaa darteed — waxaad ku caynsanaan doontaa PUA. Waa sidaas oo kale haddii aad u baahan tahay inaad daryeesho xubin ka mid ah qoyskaaga ama reerkaaga oo cudurka laga helay.

13. Maxaa dhacaya haddii dugsi ama xannaano maalmeedka ilmahayga la xiro?

Haddii aad ku tiirsan tahay dugsi, xannaano maalmeed ama xarun kale oo laguugu xannaaneeyo cunug, waalid waayeel ah ama xubin kale oo reerka ka tirsan si aad u shaqeyn karto — oo xaruntaasna loo xiray daraadded cudurka COVID-19 — waad uqalantaa caymiska shaqo-la'aanta ee hoos timaad PUA.

14. Maxaa dhacaya haddii bixiye daryeel caafimaad uu igula taliyo inaan anigu karantiilo sabab u feydsani cudurka COVID-19 ah? Waa sidee amarrada guud ee guriga lagu joogo iyaguna?

Dadka ay tahay inay is-karantiiliyaan iyo dadka aan karin inay shaqada tagaan markay karantiilka ku jiraan ayaa uqalma, illaa iyo inta ku shaqaynta isgaarsiinta aan la heli karin.

15. Waxay ahayd inaan bilaabo shaqo cusub oo immikana halkaas ma tagi karo sababta cudurka COVID-19 awgeed.

Waad uqalantaa dheefaha hoos timaad PUA. Caddaynta shaqada laguugu soo fidyay ayaa loo baahan doonaa. Walibana waad caynsanaan doontaa haddii isla markiiba lagaa joojiyay (laid off)

shaqo cusub oo aadan lahayn taariikh shaqo oo kugu filan si aad ugu qalanto dheefaha xaaladaha caadiga ah marka yihiin.

16. Waxay igu kaliftay inaan shaqadeyda ka tago awgeed cudurka COVID-19. Xaq ma u leeyahay inaan codsado dheefaha?

Arrimaha ayay ku xirantahay. Haddii loo-shaqeeyahaagu uusan shaqada kaa joojin laakiin ay ahayd inay kugu kalliftay inaad shaqada ka tagto sababtuna tahay karantiil uu ku taliyay bixiyaha daryeelka caafimaadka, ama sababta oo ah xannaano-maalmeedka cunuggaaga oo xiran oo aad tahay xannaaneeyaha hore, waxaad ku caynsanaan doontaa dheefaha shaqo-la'aanta ee hoos yimaad PUA. Hase ahaate, PUA looguma talagalay inay caymiso sheegteyaasha laga yaabo inay uga tagaan shaqada (ama raba inay uga tagaan) sababo la xiriira ka walaaca ku sii wadidda shaqada inay qatar gelinayso inuu ku dhacdo cudurka COVID-19.

17. U soo xoogsadaha reerkayga oo u dhintay sabab ahaan cudurka COVID-19. Waxaan ugu tiirsanaa qofkaas dakhli, oo mana shaqeeyo. Taasi ma caynsan tahay?

Haa. Haddii u bixiyaha kaliya ee dakhliga reerku u geeriyoodo cudurka COVID-19, lammaanahooda ayaa uqalma dheefaha PUA.

18. Kuwee ayaan u caynsanayn PUA?

PUA ma heli karaan dadka: awoodi ku shaqaynta isgaarsiinta ama haddii kale ka shaqaysan kara guriga; qaadanaaya lacag-bixinta fasaxa bukaanka ama fasaxa qoyska lacag-bixinta leh; kuwa sida cusub u soo galaya shaqaalanimada ee aan shaqo helin karin; oo hase yeeshe uqalma dheefaha shaqo-la'aanta gobolka.

19. Waxaan leeyahay xubin qoyskayga ka mid ah oo halis wayn ugu jira hadduu u fedysamo coronavirus. Way adag tahay in shaqadayda aan qabsado oo aan ilaaliyo kala fogaansho bulsheedka lagu joojinayo u feydsanka, sidaa darteed bixiyaha daryeelka caafimaadka xubinta qoyskayga k ayaa igula taliyay inaan guriga joogo. Miyaan wali uqalmaa PUA?

Waad uqalantaa PUA haddaad ku soo caddayso codsigaaga inuu bixiyaha daryeelka caafimaadku kugula taliyay inaad is-go'doonsiiso oo aadan shaqada aadin welwelka la xiriira COVID-19 oo ay ka mid noqon karto joojinta halista ufeydinta xubinta qoyskaaga fayraskan.

20. Maxaa dhacaya haddii aan ka baqayo inaan tago shaqada maxaa yeelay aniga oo feydsami kara cudurka Coronavirus oo markaa bukooda?

Arrimaha ayay ku xirantahay. Haddii aadan shaqada aadin sababtuna ka baqitaan guud oo u feydsanka COVID-19 ah, laakiin aadan qancin modkoodana sababaha la xiriira COVID-19 ee aadan shaqada u tagayn, uma qalmi doontid PUA. **Laakiin**, haddii aad cabsi macquul ah ka qabto tagitaanka shaqada (sababtuna ay tahay goobta shaqadaada oo aan la lug helin talooyinka badbaadada ee goobta shaqada ee la-xiriiirta COVID ee ay bixisay CDC ama amarro ama talooyin kale oo loo bixiyo federaal ahaan, gobol ahaan, ama dawladda hoose ahaan, oo aad si macquul ah u aaminsan tahay inaad halis u tahay inaad u feydsanto ama cudur ka qaaddo shaqada) waxa laga yaabaa inaad uqalanto dheefta PUA.

21. Maxaa dhacaya haddii aan horayba u wada isticmaalo dhammaan dheefahayga shaqala'aan?

J: Laga bilaabo toddobaadka Mey 18^{keeda}, toddobaadyo dheeraad ah oo dheefaha shaqala'aanta ayaa loogu heli karaa iyada oo loogu eego dib taariikh ahaan dadka u ka dhammaaday dheefihii shaqala'aanta gobolku. Toddobaadyadan dheeriga ah aya heli karaan qof kasta oo ay dheeftoodu dhammaatnayso Julaay 1, 2019 ama inta ka dambaysa oo haddii kale uqalma. Dheefaha waxa la siin doonaa iyada oo loo eego toddobaadkii dhamaanayay Maarso 21, 2020 ama toddobaadka ay qofka shaqala'aantu ka dhammaanayso gobolkaaga, koolba kii dambeeya. Sheegashooyinka uqalmitaan ee toddobaadlaha ah waa in la xereeyaa toddobaadyadaas si lacagahaas loo bixiyo. Haddii aadan xerayn toddobaadka dhammaanayay 21ka Maarso ama intii ka dambeysay, fadlan dhexgal akoonkaaga barta ReEmployME si aad u xereyso sheegashooyinkaas uqalmitaan. Qof kasta oo qanciya shuruudaha uqalmitaanka ee ay ka dhammaadeen dheefahooda shaqala'aanta gobolku waxa la siin doonaa Taakulaynta Shaqala'aanta Safmareenka (PUA) loogu talagalay toddobaadyada dhammaanaya Maarso 21 iyo Maarso 28. Laga bilaabo toddobaadka dhammaanaya Abriil 4 iyo wixii ka dambeeya, Magdhowga Shaqala'aanta La Dheereeray ah ee Safmareenka (PEUC) ayaa billaabmi doona. Toddobaadyada dhammaanaya Abriil 4 illaa Julaay 25, 2020, \$600 ee dheeraadka Magdhowga Shaqala'aanta ee Faafidda Safmareenka ayaa walibana la bixin doonaa.

22. Waxaan ahay arday dugsiga sare dhigta oo haysta shaqo qayb-wakhtigeed ah—ma codsan karaa oo aan uqalmi karaa shaqala'aan?

Haa, shaqaalaha oo ay ku jiraan kuwa ka yar 18 sano ee kasbada mushqaayadaha (oo ay ku jirto qayb-wakhtigeedka) shaqooyinka caynsan ee bilaa shaqada noqdda ayaaxsrayn kara shaqala'aanta. Waxaad uqalmi kartaa dheefaha shaqala'aanta ee hoos yimaad dheefta shaqala'aanta caadiga ah ee gobolka iyada oo loo qaadanayo inaad haysato mushqaayado ku filan oo qanciya shuruudaha uqalmidda lacageed iyo dhammaan shuruudaha kale (tusaale ahaan, shaqala'aanta uqalanta, yo inaad karti uu leedahay oo diyaar aad u athay shaqada, iwm). Waxa kale oo aad uqalmi doontaa sidoo kale \$600 oo dheeraad toddobad kasta oo bixin lacag federaal ah.

Haddii aadan uqalmin shaqala'aanta gobolka ee caadiga ah oo sababtuna tahay inaad haysan mushqaayado ku filan oo aad si toos ah kuu saamaysay COVID-19, waxaad uqalmi kartaa shaqala'aan hoos timaadda barnaamijka federaalka ee cusub ee (PUA), iyado aan loo eegeyn da'da ama xaaladda ardayga. Tusaale ahaan, ardayga wakhtiga buuxa wax barta ee shaqeeya saacado yar toddobaadkiiba oo shaqeeya saacadaha qaybkood oo noqda shaqala'aan, qayb ahaan shaqala'aan, ama aan karin inuu shaqeeyo awgeed si toos ah xaladda COVID-19 ayaa laga yaabaa inuu uqalmo shaqala'aanta hoos timaad Barnaamijka federaalka ee PUA.

23. Shaqaalaha dugsigu ma uqalmaan caymiska shaqala'aanta muddada lagu jiro bilaha xagaaga?

J. Haddii shaqaalaha dugsigu sida caadiga ah u ka shaqeeyo shaqo xagaaga ah oo shaqadaas aan la shaqayn karin awgeed sababo la xiriiira Covid-19, shaqaalahaas dugsiga ayaa ku caynsanaan doona Barnaamijka Taakulaynta Shaqala'aanta Safmareenka (PUA). Barnaamijkan caymiska shaqala'aanta federaalka (UI) ayaa caymiya qof kasta oo aan uqalmin dheefaha UI ee gobolka iyo kuwa sababta shaqala'aantoodu tahay cudurka Covid-19. Shaqaalaha dugsiga ee aan sida caadiga ah u shaqeeynin xilliga xagaaga ayaan u ahayn shaqala'aan awgeed sababo Covid-19 oo markaana uma qalmo

shaqala'aanta(UI). Xeerka Maine ayaa ka mamnuucaya shaqaalaha dugsigu inay qaataan dheefta shaqala'aanta inta lagu jiro bilaha xagaaga. PUA waa barnaamij ay 100% dawladda federaalku fuundaysaa sidaa darteed dheefta laga bixiyo barnaamijkaas ayaan lagu dallici karin dugsiga.

MUDDO JIRITAANKA DHEEFAHA

24. Muddo intee le'eg ayay sii jiri doontaa caymiska shaqo-la'aanta la ballaariyay ee hoos timaad PUA?

Caynsanaanta la ballaariyay (illaa 39 toddobaad) ee hoos timaad PUA ayay heli karaan shaqaalaha shaqadooda ay saamayn ku yeelato cudurka COVID-19 illaa Disambar 26, 2020. Caynsanaanta ayaa dib ugu eegitaan leh illaa Maarso 15 ama markay meheradda saamayn ku yeelatay COVID-10 kolba kii ugu dambeeyay. Haddii qof iskii-u-shaqeyste ah ay saameysay in ka horreysay Maarso 15, waxay u baahan doonaan inay arrinta kala shaqeeyaan wakiil shaqala'aan si shegashadooda taariikhda dib intaas ka shisheysa loogu eego.

CADDAYNTA ISKAA-U-SHAQAYSADKA — Ha gudbbin waraaqo-hawleedka illaa lagu ogeysiyo mooyee.

25. Maxaa caddayn ah ee aan u baahannahay si aan ugu gudbiyo iskaa-u-shaqaysadkayga?

Maadaama mushqaayadaha dadka iskood-u-shaqeysta looga warbixin Waaxda, caddaynta kasbashada ayaa loo baahan doonaa. Dheefaha PUA ayaa bilaabmi doonaan kahor caddayntan – **ha soo gudbin waraaqo-hawleedka waqtigan**. Wasaaradda ayaa si firfircoon oo horay ah u ogeysiin doonta dadka iskood-u-shaqeysta markii la gaaro soo gudbinta dukumiintiyada, waxa la bixinayo iyo sida loo bixiyo.

WAX KALE

26. Dheefaha shaqo-la'aanta miyaa canshur laga qaadaa?

Haa. Markaad xerayso codsigaag hore, waxaad dooraneysaa inaad rabto canshuur gobolka iyo federaalka lgaa hayo iyo in kale. Tan waxa ka mid ah Magdhawga Shaqo-la'aanta Saf-Mareenka ee Fedraalka (FPUC) ee ah dheefta dheeriga toddobaadlaha ah ee \$600 ah, ee la heli karo illaa Julay 25, 2020. Dhammaadka 2020 waxaad heli doontaa 1099G oo ah dakhligaaga ka soo galay shaqo-la'aanta looguna talagalay diiwaankaaga cashuurta.